**Golaha ka hortagga dembiyada**
**BROTTSFÖREBYGGANDE RÅDET**

**Xarunta Taariikhda Maguuraanka ah**
**FORUM FÖR LEVANDE HISTORIA**

# Dulqaaxumo
# Intolerans

## Yuhuudnacayb, argagax ka qabidda dadka khaniiska ah, diinta Islaamka iyo dabeecadaha shisheeyenacaybka dhallinyaro badani qabto
## Antisemitiska, homofobiska, islamofobiska och invadrafientliga tendenser bland unga

## Tifaftir
## Sammanfattning

**TAARIIKH**
**BAKGRUND**

Dulqaadxumadu - waxay u dhacdaa siyaabo kala duwan oo ay ka mid yihiin takooridda, kadeedka, aflagaaddada, hanjabaadaha iyo waxyeeleyn jir ahaan oo lagu kaco dadka laga tirada badan yahay, waana dhibaato weyn oo bulshada ka dhexjirta. Haddaba, si loo tuurtageliyo la dagaallanka dulqaadxumada, waxaa lamahuraan in aqoon loo yeesho arrimahaas - quwaddooda, qaabkooda, meelaha ka jiraan iwm. Aqoonla'aantu waxay khatar ka dhigeysaa in tallaabooyinka la qaadaa ay noqdaa kuwo meel qalad ah lagu aaddiyo. Baaritaankaan oo ay iska kaashadeen Golaha ka hortagga dembiyada iyo Xarunta Taariikhda Maguuraanka ah waxaa lagu dersaa yuhuudnacaybka, argagax ka qabidda dadka khaniiska ah, diinta Islaamka iyo dabeecadaha shisheeyenacaybka dhallinyaro badani qabto, iyadoo si gaar ah isha loogu haynayo dabeecadaha, geesashada dhibaatooyinka, dembiyo ku dhaqmidda iyo fidinta dacaayado xagjir ah.

**UJEEDDO IYO SU'AALO**
**SYFTE OCH FRÅGESTÄLLNINGAR**

Ujeeddada ugu mudan oo laga leeyahay waxa weeye in la sawirto dabeecadaha dhallinyarada oo ku saabsan yuhuudnacaybka, argagax ka qabidda dadka khaniiska ah, diinta Islaamka iyo shisheeyenacaybka. Daraasaddu waxay kaloo iftiimineysaa waxyeelada dhallinyarada soo gaadha iyo ka qaybgalka ay ka qaybgalaan noocyada kala geddisan ee dembiyada iyo dabeecadaha bulshadiidka ah oo arrintaa la xiriira.

Dembiyada iyo dabeecadaha bulshadiid waxaa looga arrimo badan kala ka yihiin dabeecadaha sharafjebinta, oo ay mid yihiin waxyeelo loo geysto qof ama hanti, kadeedyo iyo arrimo kaloo dad takoorid ah. Baaritaanku wuxuu kaloo qiyaasayaa fidinta dacaayadaha xagjirka ah iyo kuwa midabtakoorka ah.

Waxaa daraasadda lagu baarayaa:

- Dabeecadaha dhallinyarada oo ku aaddan dadka laga tirada badan yahay iyo guud ahaan ajnebiga.
- Inta ay le'eg yihiin noocyada kala duwan ee sharafdhaca dhallinyarada loo geysto asal ahaantooda, diintooda ama iyadoo loo arko in ay khaniisiin yihiin. Wuxuu baaritaanku ku qotomaa warar dhallinyarada laga soo ururiyey.
- Inta ay le'eg tahay ka qaybqaadashada dhallinyarada ee dabeecadaha sharafdhaca ah oo ku aaddan asalkooda, diintooda ama khaniisnimadooda.
- Haddii ay jirto xiriir ka dhaxeeya dulqaadxumada iyo arrimaha dhaqandhaqaalaha iyo asalka jinsiyeed.

#### WAXAA SU'AALO KA JAWAABAY 10600 ARDAY
#### 10 600 ELEVER HAR BESVARAT ENKÄTEN

Daraasaddaani waxay ku dhisan tahay baaritaan ballaaran oo lagu sameeyey ardayda dhigata fasalada siddeedaad iyo sagaalaad ee dugsiyada dhexe/hoose iyo kuwa dhigta fasalada koowaad, labaad iyo saddexaad ee dugsiyada sare. Arday dhigata fasalada la soo xusay ayaa si kedis loo soo xushay. Xulashada ardayda dugsiyada dhex/hoose iyo kuwa sare waxaa lagu saleeyey barnaamij loo qaybiyey dusgiyada sare. Waxaa fasal walba la siiyey xaashiyo su'aalo ku qoran yihiin oo ay ardaydu ka jawaabeen xilliga casharada lagu guda jirey. Su'aalahanna waxaa looga jawaabay hab qarsoodi ah. Waxaa la soo xushay 672 fasal, waxaana jawaabo laga helay 606 fasal. Heerka kama dambaysta ah ee qof ahaaneed waxa weeye 76,2%, haddii laga reebo fasaladii la soo xushay balse aan baaritaanka ka qaybgelin. Heerka kama dambaysta ah ee fasalada baaritaanka ka qaybgalay waxa weeye 82%. Qoraalada baaritaankuna waxay ka kooban yihiin jawaabo laga helay 10600 oo arday.

Kuwa aan jawaabta laga helin waxay ku badan yihiin dugsiyada sare, gaar ahaan ardayda dhigata barnaamijyada farsamada gacanta iyo kuwa qaab gaar ah habeeyey. Kaasoo ah in 31,6% aysan soo jawaabin. Taasina waxay keeneysaa in badbadin lagu sameeyo dhallinyarada qabta dabeecado dulqaadxumo ah.

#### QIYAASIDDA DABEECADAHA DULQAADXUMADA AH, KADEEDKA IYO GEYSASHADA DHIBAATOOYINKA
#### MÅTT PÅ INTOLERANTA ATTITYDER, UTSATTHET OCH DELAKTIGHET

In la cabbiro dabeecadaha yuhuudnacaybka, islaamnacaybka, khaniisnacaybka iyo ajnebidiidka waxaa laga eegay hababka kala duwan oo dabecadahaas loo muujiyo, kuwaas oo meelo badan isaga mig ah. Waxaana kuwaas ka mid ah iyadoo koox la isku wadaqaado oo loo mujiyo shaki iyo aaminaad-darro, aad loo nebcaado iyo la diido in wax lagu darsado iyo weliba in diyaar loo noqdo in la qaado ama la kaalmeeyo tallaabooyin lagu takoorayo dad ka tirsan kooxaha laga hadlay.

Qoraalka su'aalaha waxaa lagu soo gudbiyey su'aalo tiro badan oo jawaabahooda horey loogu diyaariyey oo ku saabsan waxa laga qabo dad kala duwan oo laga tira badan yahay oo Iswiidhan deggan. Su'aaluhu waxay u qornaayeen hab wax sheegid ah oo la doonayey in ay ardaydu heerka ay hadalkaa ugu raacsan yihiin ama ugu diiddan yihiin. Tusaale: ”Muslimiinta Iswiidhan waxay xaq u leeyihiin in ay masaajiddo dhistaan”; Waa wax la aqbali karo in jiiraan lala noqdo qof muslim ah oo dhaqan wanaagsan”; Muslimiintu Iswiidhan si xaq dhaaf ayey ugu so bateen”, iwm.

Waxaa la weyddiiyey su'aalo kuwaas la mid ah oo ku saabsan yuhuudda iyo khaniisiinta. Jawaabaha su'aalahana xiriir ayaa ka dhexeeya. Waxaana jawaabaha la helay heerar dabeecadeed oo ku aaddaan kooxaha la soo xusay. Heerarka jawaabuhuna waxay leeyihiin qiyaas dhexe oo ka bilaabata 0 kuna dhammaata 4. Qiimaha ugu sarreeyaa (4) wuxuu muujinayaa in la raacsan yahay hadalka wax nacaybka ah oo la diiddan yahay hadalka soo dhoweynta xambaarsan.

Kol haddii dabeecadaha ku aaddan muslimiinta, yuhuudda iyo khaniisiintu ay meelo badan isaga mig yihiin waxaa sameeyey hab lagu cabbirayo dulqaadxumada loo qabo kooxahaas. Waxaa kaloo la soo bandhigay su'aalo kaloo ku saabsan aragtida laga qabo dadka shisheeyaha ah, kuwaasoo lagu xusay qoraalka labaad.

Waxaana dabeeciyan dhici kara in hadalada iyo su'aalaha baaritaankaan lagu soo bandhigay loo arko mid caro keeni kara. Taasina waxay lamahuraan u sidii loogu heli lahaa jawaabo iyo fkraddhiibasho ka turjumaya dabeecadahaas. Isla markaasna waxaa mudnaan leh in carrabka lagu dhufto in qaar badan oo oraahaha ka mid ahi ay wataan hadalo macaan oo looga dan laha in aan lagu qaldin oo la iska ilaaliyo hadalo dad gaar ah ka carreysiin kara.

Waxaa kaloo la soo bandhigay su'aalo ku saabsan waxyeelada dad ama kooxo loo geysto iyo ka qaybqaadashada dhaqamada bulshadiidka ah oo dad kale lagu dhaqmo. Waxaa mudnaan leh in la xuso su'aalaha loo soo diyaariyey hab lagu cabbirayo habka ardaygu wax u turjumayo iyo aragtidiisa kolka la eego asalka, diinta ama hab-galmeedka qofka la waxyeeleeyey, taasoo laga wado tusaale ahaan in lagu cadaadiyey sabab ah in loo arko in uu khaniis yahay.

# Natiijo
# Resultat

**ARDAYDA BADANKEED ARAGTI WANAAGSAN AYEY KA QABAAN DADYOWGA LAGA TIRAD ABADAN YAHAY**
**DE FLESTA ELEVER ÄR POSITIVT INSTÄLLDA TILL OLIKA MINORITETER**

Natiijadu waxay muujineysaa in dhallinyarada badankeed ay aragti wanaagsan ka qabaan dadyowga laga tirada badan yahay. Dhallinyarada ka qaybgalay baaritaankaani waxay muujiyeen in ay ku raacsan yihiin hadalka oranaya in muslimiinta badankood (ama yuhuudda ama khaniisiinta) ay run ahaan yihiin ”dad wanaagsan” iyagoo isla markaas ka fogaaday hadalada dadnacaybka ah. Qiyaasta heerka dulqaadxumada loo hayo muslimiinta, yuhuudda iyo khaniisiinta waxa weeye qiyaastii 1 (meesha 4 ugu sarreeyo). Heerka qiyaasta koox walba gaar ahaan wuu kala geddisan yahay (wuxuu dhexeeyaa 0,9 oo khaniisiinta loo qabo iyo 1,2 oo muslimiinta loo qabo). Qiyaasta inta qabta aragti wanaagsan oo lagu cabbiray qiimaha ugu hooseeya (<1,5) waxay kala yihiin: 66% oo muslimiinta ku aaddan, 68% oo yuhuudda ku aaddan iyo 74% oo khaniisiinta ku aaddan. Qiyaasta dulqaadxumadu waxaa weeye 72%. Guud ahaan dhallinyaradii soo jawaabtay waxay 10kii dhallinyaro 7 ka mid ahi muujiyeen aragyo wanaagsan.

Qaybta qabta aragti dulqaadxumo aad u sarreysa, oo lagu cabbiray qiimaha ugu sarreeya oo ah (>2,5) waxa weeye qiyaastii 8% oo muslimiinta ku aaddan, 6% oo yuhuudda ku aaddan iyo 7% oo khaniisiinta ku aaddan. Dulqaadxumada guud ee baaritaanku wuxuu noqonayaa 5%. Guud ahaan 20kii dhallinyaro ahba 1 ayaa muujiyey aragtiyo aad u qallafsan. Qaybta ardayda qabta nacayb saa'id ah (>3) waa wax yar oo ka kooban 1,7%. Waxaa kaloo jira koox lagu qiyaasi karo in ay ”shakisan yihiin” ama aan go'aan gaari karin. Kooxdani waxay dhallinyarada ka noqonayaa kolka laga eego dhanka dulqaadxumada boqolkiiba 24. Qaybtani waxay qabaan aragtiyo la mid ah kuwii la soo xusay ay ka qabaan kooxaha ka duwan.

Aragtida laga qabo shisheeyaha iyo dadka dalka soo geliya waxaa lagu cabbiray hadalo ay ka mid yihiin, tusaale ahaan: ”Iswiidhan waa in ay sii waddaa qaabbillaadda qaxootiga.” Qaybta ka soo horjeedda hadalkaani waxa weeye qiyaastii boqolkiiba 12. Wuxuu hadal kale u dhigan yahay: ”Shisheeyaha Iswiidhan ku nool oo ka yimid dalal Yurub ka baxsan, waa in ay dalalkoodii ku noqdaan.” Qaybta hadalkaan taageersanina waxa weeye boqolkiiba 10. Sidaas oo kale waxay boqolkiiba 10-ni ku jawaabtay in aysan wax ka qabin ama ay caadi u arkaan haddii uu saaxiibkood gidaarada magaalada ku qoro hadalo uu ka mid yahay ’soogelidda shisheeyaha ha la joojiyo’.Dhallinyarada muujisay fekrado shisheeyenacayb ah waxaa cabsi looga qabaa in ay qabaan aragtiyo qallafsan oo ka qabaan muslimiinta, yuhuudda iyo khaniisiinta.

**DULQAADXUMADU WAA AY KU YAR TAHAY GABDHAHA KOLKA WIILASHA LOO EEGO**
**FLICKOR ÄR MINDRE INTOLERANTA ÄN POJKAR**

Waxaa cad in farqi weyni u dhexeeyo gabdhaha iyo wiilashu aragtiyaha ay ka qabaan kooxahaas kala duwan. Gabdhuhu waxay badanaaba qabaan aragtiyo wanaagsan kolka la barbardhigo aragtiyaha wiilasha. Wiilasha boqolkiiba 60 ayaa qaba aragtiyo wanaagsan meesha boqolkiiba 10 ay ka qabto aragtiyo qallafsan. Gabdhahase boqolkiiba 82% ayaa qaba aragtiyo wanaagsan meesha ay boqolkiiba 2 ka qabto aragtiyo qallafsan. Dabeecadaha gabdhuhu muujiyeen aad ayuu kala geddisan yahay kolka loo eego wiilasha. Farqiga ugu weyn ee gabdhaha iyo wiilasha u dhexeeyaa waxa weeye aragtida ay ka qabaan khaniisiinta. 10kii gabdhoodba 9 ayaa aragti wanaagsan ka qaba meesha 10kii wiil 6 ay aragtidaas qabto.

**FARQIGA DA’DUHU WUU YAR YAHAY**
**ÅLDERSSKILLNADERNA ÄR SMÅ**

Waxay u muuqataa in ardayda waaweyni ay qabaan aragti ka wanaagsan tan ardayda yaryari qabaan. Aragtida wanaagsani waxay ugu yar tahay ardayda dhigata fasalka siddeedaad ee dugsiyada dhexe/hoose (boqolkiiba 68) meesha ugu badan tahay ardayda dhigata fasalka saddexaad ee dugsiyada sare (boqolkiiba 78).

**FARQIYADA ARAGTIYAHA KOLKA LAGA EEGO QAYBAHA WAXBARASHADA DUGSIYADA**
**SKILLNADER I INSTÄLLNING EFTER SKOLPROGRAM**

Qaybta ardayda dugsiyada sare ee fekrad qallafsan ka qaba muslimiinta, yuhuudda iyo khaniisiintu waxay ugu sarreysaa ardayda dhigata waxbarashada caadiga ah, waxaana muuqata in ay ku badan tahay wiilasha. Ardayda qabta aragtiyaha ugu wanaagsan waxay ku badan yihiin gabdhaha dhigta barnaamijyada waxbarasha-diyaarinta ee dugsiyada sare. Qaybta gabdhaha waxbarashadaan dhigta oo qaba aragtiyaha qallafsani waxa weeye boqolkiiba 0,1 meesha ay aragti wiilasha dhigta waxbarashooyinka kale ay ka tahay boqolkiiba 11.

**WAXAA MICNE WEYN KU FADHIYA DALKA LOO DHASHAY IYO DIINTA LA AAMMINSAN YAHAY**
**URSPRUNGSLAND OCH RELIGIONSTILLHÖRIGHET HAR VISS BETYDELSE**

Ardayda jinsigoodu Iswiidhishka yahay (waa ardayda ku dhalatay Iswiidhan oo labadooda waalid iswiidhishka yihiin) waxay aragti qallafsan ka qabaan muslimiinta kolka loo eego ardayda ajnebiga ah (waa ardayda ku dhalatay dal kale oo labadooda waalid ay ajnebiga yihiin). Kooxda koowaad boqolkiiba 9 ayaa lagu qiyaasi karaa in ay qabaan aragti qallafsan (>2,5) meesha kooxda dambe ay boqolkiiba 1,5 qabaan aragti taas la mid ah. Aragti taas ka duwan ayaa muuqata kolka wax laga weyddiiyo khaniisiinta, halkaasoo ardayda ajnebiga ahi qaataan fekrad ka gaabsi ah. Waxaa lagu qiyaasay in boqolkiiba 12 ardayda ajnebiga ahi ay qabaan aragti qallafsan meesha boqolkiiba 6 ardayda iswiidhishka ahi ay ka qabaan aragti taas la mid ah. Kolka laga aragtiyaha laga qabo yuhuudda wax farqi ahi u ma dhexeeyo ardayda ajnebiga ah iyo kuwa iswiidhishka ah (qiyaastii boqolkiiba 6 ayaa qaba aragti qallafsan).

Koox aad u yar (boqolkiiba 1,7) ayaa uga soo horjeeda muslimiinta, yuhuudda iyo khaniisiinta (>3), waxay ardaydaasina gebi ahaan ka kooban yihiin arday ku dhalatay Iswiidhan (boqolkiiba 99,5).

Koox weyn oo arday ah oo aan wax fekrad ah ka dhiiban diinta ay aamminsan yihiin (boqolkiiba 40) ayaa waxay u muuqdaan in badanaaba aragtiyo qallafsan ka qabaan dadka laga tirada badan yahay

(boqolkiiba 7 ayaa qaba kolka la barbardhigo boqolkiiba 5 ardayda oo dhan). Kolka laga eego aragtida laga qabo yuhuudda, waxaa isku mid ah aragtida dadka aan diintooda sheegin iyo kuwa sheegtay in ay muslin yihiin (qiyaastii boqolkiiba 8 ayaa qaba aragti qallafsan).

#### FIDINTA DACAAYADAHA XAGJIRKA AHI WAXAY KU BADAN YIHIIN KUWA QABA ARAGTIYAHA QALLAFSAN
#### SPRIDNING AV EXTREMISTISK PROPAGANDA VANLIGARE BLAND DE INTOLERANTA

Qiyaastii boqolkiiba 7 ardayda ayaa waxay caddeeyeen in ay xiriir la sameeyeen ururo xagjir ah iyo kuwa midabtakoor ah. Ururka ugu caansani waxa weeye Nationalsocialistisk Front (Jabhadda Hantiwadaagga Bulshadeed). Kuwa aragtiyaha qallansan ka qaba dadka laga tirada badan waxay boqolkiiba 30 xiriir la yeesheen ururo noocaas ah, meesha kuwa qaba aragtiyaha wanaagsani ay boqolkiiba 6 xiriir la yeesheen ururadaas. Waxaa laga soo bilaabo sannadkii 1997 Internet ku batay boggaga fidiya fekradaha midabtakoorka. Boqolkiiba 7 ardayda ayaa waxay baaritaan ku sheegeen in ay booqdeen boggaga Internet-ka oo ajnebinacaybka ama midabtakoorka. Kuwa aragtiyo wanaagsan ka qaba dadka laga tirada badan yahay boqolkiiba 2 ayaa sidaas sameeyey meesha kuwa qaba aragtiyaha qallafsani ay boqolkiiba 38 sidaas sameeyeen.

Ururada qarsoodiga ah oo midabtakoorka aamminsani waxay mabaadi'dooda ku fidiyaan muusigga. Boqolkiiba 15 ardaydu waxay sheegeen in ay ugu yaraan hal mar dhegeysteen muusiga loo yaqaan muusiga quwadda caddaanka. Kolka la barbardhigo baaritaamo horay loo sameeyey waxaa muuqata in kooxaha qaarkood ay arrimo noocaas ku soo bateen. Sannadkii 1997 waxay qiyaastii boqolkiiba 19 wiilasha dhigta qaybta farsamada gacanta sheegeen in ay mar uun dhegeysteen muusiga noocaas ah meesha qiyaastii boqolkiiba 25 wiilasha dhigta qaybta xirafadaha ay muusigaas mar uu dhegeysteen.

#### INTA AAN HUBIN IN XASUUQII YUHUUDDU DHACAY WAAS OO YARAADEEN
#### ANDELEN INTE ALLS SÄKRA PÅ ATT FÖRINTELSEN ÄGT RUM HAR MINSKAT NÅGOT

Baarintaan hore oo la sameeyey 1997 ayaa waxa ardayda lagu weyddiiyey in ay aamminsan yihiin inuu xasuuqii yuhuuddu dhacay iyo in kale. Su'aashauna waxay ahayd: "'Xasuuq' waxaa looga jeedaa dilkii uu Naasigu ku gumaaday lix milyan oo yuhuud ah intii dagaalkii labaad oo dunidu socday. Sidee u aamminsan tahay in 'Xasuuqaasi' dhacay?".

Su'aasha waa canbaareeyey kolka laga eego in tirada yuhuudda xasuuqaas lagu dilay keeni karto in laga shakiyo. Waxaa baaritaan kale lagu soo bandhigay saddex su'aalood oo laga saaray in lagu xuso tirada dadkii dhintay: Su'aalahaasna waxaa la barbardhigay su'aashii hore, natiijaduna waxay noqotay mid aan jawaabo kala geddisan muujin.

Su'aashii hore ayaa lagu soo bandhigay baaritaanka cusub. In kastoo dhibaato lala kulmay is barbardhigga su'aalaha waxaa haddana natiijada ku cad laba arrimood. Midi waxa weeye in dadkii "aad u aamminsanaa" ay soo yaraadeen ilaa baaritaankii 1997. Baaritaankaan waxaa boqolkiiba 67 caddeyeen in ay aad u aamminsan yihiin meesha boqolkiiba 71 ku sheegeen baaritaankii 1997. Midda kalena waxa weeye in dadkii aan aamminsanayni, kuwa ka shkisan, ay soo yaraadeen. Baarintaankii 1997 boqolkiiba 4,1 waxay sheegeen in aysan aamminsanayn meesha boqolkiiba 2 ku caddeeyeen baaritaankaan. Guud ahaan qaabka jawaabuhu waa isu eg yihiin labada baaritaanba (qiyaastii boqolkiiba 85 iyo boqolkiiba 83 ayaa ku jawaabay in ay aamminsan yihiin ama aad u aaminsan yihiin).

Labada baaritaanba waxaa ardayda lagu weyddiyey in ay fekradooda ka dhiibtaan hadalka oranaya "Aad ayaa intaa looga hadlayaa naasiisimka iyo xasuuqii yuhuudda". Haddaba, waxaa muuqata in ardayda hadalkaa raacsani ay bateen meesha kuwa aan raacsanayni ay yaraadeen. Natiijada labada baaritaan waxaa ka muuqda in ardayda ka shakisan in xasuuqii yuhuudu dhacay ay yihiin kuwa qaba in intaa aad looga hadlayo naasiisim iyo xasuuqii yuhuudda.

#### BOQOLKIIBA 40 ARDAYDA DIBEDDA KU DHALATAY WAXAA MAR UUN LOOGU CAAYEY JINSIYADDOODA
#### 40 PROCENT AV UTLANDSFÖDDA ELEVER NÅGON GÅNG RETADE PÅ GRUND AV SITT URSPRUNG

Habka ugu caansan oo dadka wax loogu geysto waxa weeye aflagaaddada. Qiyaastii boqolkiiba 14 waxay ardaydu sheegeen in laba iyo tobankii bilood oo la soo dhaafay loogu caayey ugu yaraan mar dhalashadooda iswiidhishka ama ajnebiga ah. Boqolkiiba 6 ayaa iyana loo hanjabay. Inta ku jawaabtay in

dhalshadooda gacan loogu geystay waxay gaarayaan boqolkiiba 2,6. Waxaa kaloo la weyddiiyey haddii diinta ay aamminsan yihiin awgeed dhibaato loogu geystay. Guud ahaan boqolkiiba 4 waxay sheegeen in loogu aflagaaddeeyey, boqolkiiba 1,7 in loogu faqooqay, boqolkiiba 0,9 in loogu hanjabay iyo boqolkiiba 0,5 in gacan loogu geystay diintooda awgeed.

Waxaa dhibaatooyinka dadka loo geysto ka muuqda in ardayda dalka dibeddiisa ku dhalatay oo walidkood ajnebiga yahay ay kaga badan tahay kuwa iswiidhishka ah. Tusaale ahaan boqolkiiba 40 ardayda ajnebiga ah loogu aflagaaddeeyey dhalashadooda meesha dhallinyarada iswiidhishka ah ay ka tahay boqolkiiba 9. Boqolkiiba 31 ardayda ajnebiga ah waxaa lagu caayey ”nacalad madaxmadow/turki ah/sanweyn” (”jävla svartskalle/turk/blatte”) meesha boqolkiiba 14 ardayda iswiidhishka ah lagu caayey ”nacalad iswiidhish ah” (svenskjävel/ jävla svenne). Waxaa kaloo caadi u ardayda ajnebiga ah in laba iyo tobankii bilood oo la soo dhaafay ay dareemeen in hab caddaalad-darro ay u la dhaqntay (boqolkiiba 46) cid kale (sida hay’ad) meesha ardayda ka tahay boqolkiiba 9. Ardayda ajnebiga ahi waxay sheegeen in boqolkiiba 6 gacan loogu geystay dhalashadooda, boqolkiiba 15 loogu hanjabay.

Ardayda wax loo geystay waxay kaga duwan yihiin ardayda aan wax loo geysan in dareen xun ku dhacay (waxay dareemeen ”isku buuq iyo niyadjab”, xanaaq, welwel ama ay ku adkayd in ay gam’aan) waqtiyadii ugu dambeeyey.

Dhanka kale ardayda siyaabo kala duwan wax loogu geystay iyadoo dadka kale u arkaan in ay khaniisiin yihiin, waxaa keliyoo arrintaa wax laga weyddiiyey ardayda dugsiyada sare. Boqolkiiba 2,1 ardaydaa ka mid ah waxay sheegeen dhibaato loo geystay kadib markii dadka kale ku tuhmeen in ay khaniisiin yihiin. Dhibaatada weyni waxa weeye in lagu caayo (boqolkiiba 1,9), meesha boqolkiiba 0,2 loogu hanjabay, boqolkiiba 0,3 gacan loogu geystay.

#### BOQOLKIIBA 1,5 WAXAY SHEEGEEN IN AY QOF GACAN UGU GEYSTEEN DHALASHADIISA AJNEBI AHAAN AWGEED
#### 1,5 PROCENT ANGER ATT MAN SLAGIT NÅGON PÅ GRUND AV DENNES UTLÄNDSKA URSPRUNG

Su’aalaha waxaa ka mid ahaa habka looga qaybqaatay dabeecado bulshadiid ah iyo haddii su’aalahaas ku xiran yihiin dhalashada qofka wax loo geystay. Marka laga hadlo ka qaybqaadashada waxay boqolkiiba 33 ardaydu sheegeen in ay laba iyo tobankii bilood oo la soo dhaafay ay qof u caayeen, kolkaasoo qofkii la caayey uu ”carooday ama murugooday”. Qiyaastii boqolkiiba 30na waxay sheegeen in qof u hanjabeen oo uu qofkaasina cabsaday ama ay qof gacan u geysteen oo uu qofkaasina xanuunsaday.

Tirada sheegatay in ay laba iyo tobankii bilood oo la soo dhaafay qof ugu caayey ”dhalashadiisa ajnebinimo awgeed” waxay dhan yihiin boqolkiiba 8. Tirada wax u hanjabtayna waxa weeye boqolkiiba 1,7 meesha tirada qof ajnebi ahaan gacan ugu geystay ay ka yihiin boqolkiiba 1,5.

Kolka laga hadlo dhalashada iswiidhishka, waxay boqolkiiba 2,6 sheegeen in ay ugu caayeen, boqolkiiba 0,7 qof ugu hanjabeen, boqolkiiba 0,6 ay qof gacan ugu geysteen dhalashadiisa iswiidhish awgeed.

Xagga diinta waxay boqolkiiba 4 sheegeen in ay qof ugu caayeen diintiisa awgeed meesha tirada wax u hanjabay (0,8) ama gacan u geystay ay ka yar yihiin (0,6). Waxaa sidaas oo kale ah haddii qof wax loogu geystay khaniisnimadiisa awgeed: qiyaastii boqolkiiba 5 waxay sheegeen in ay qof ku caayeen meesha boqolkiiba 1,3 ay ugu hanjabeen, boqolkiiba 0,8 ay gacan ugu geysteen.

Waxaa kaloo la weyddiiyey haddii qof siyaabo kala duwan wax loogu geystay ”dhalashadiisa, diintiisa ama midabkiisa awgeed”: Takoorid, beenfidin, wax xun ka sheegid, la dirir, riix ama wax ka halay. Boqolkiiba 13 ayaa waxay sheegeen in ay waxyaabahaas mid ka mid ah sameeyeen laba iyo tobankii la soo dhaafay. Waxa ugu badani waxa weeye in qof ”wax xun la sheego” (boqolkiiba 10) iyo in qof la daandaansado (boqolkiiba 5).

#### XIRIIR CAD OO KA DHEXEEYA DULQAADXUMADA IYO DABEECADAHA BULSHADIID
#### TYDLIGA SAMBAND MELLAN INTOLERANS OCH DELAKTIGHET I ANTISOCIALT BETEENDE

Waxaa daraasaddu muujineysaa in xiriir ka dhexeeyo dabeecadaha lagu diiddan yahay muslimiinta, yuhuudda iyo khaniisiinta iyo ka qaybqaadashada arrimaha bulshadiidka ah oo lagu la kaco qog dhalashadiisa, diintiisa ama khaniisnimadiisa awgeed. Taasi waxay astaan u tahay oo kale dabeecadaha ajnebidiidka ah. Cid ay ku weyn tahay dulqaadxumada, waxaa u fududaada in uu qof caayo, u hanjabo ama gacan u geysto.

Waxaa kaloo muuqata in dabeecadahaasi ay astaan u yihiin ka qaybqaadashada dembiyada. Xiriirka ugu weyn oo ka dhexeeya waxa weeye in qofka dhallinyarada ahi uu falkaa u sameeyey dhalashada qofka uu u geystay awgeed. Taasna gabdhaha iyo wiilashuba waa ka wada siman yihiin.

Waxaa aad aan caadi u ahayn in ardayda aragtida wanaagsan ka qaba muslimiinta, yuhuudda iyo khaniisiintu ay sheegtaan in ay qof ugu caayeen, ugu hanjabeen ama gacan ugu geysteen dhalashadiisa ama diintiisa awgeed (boqolkiiba 0,1) meesha ay taasi ku badan tahay koox arday ah oo ah kuwa ugu aragti qallafsan (boqolkiiba 36,8). Haddii qofka wax loo geystay oo khaniis uu dhalasho ama diin kale haysto waxay tiradu noqoneysaa: Boqolkiiba 0,3 kuwa aragtida wanaagsan qabaa waxaa sheegeen in ay mar qof u hanjabeen ama gacan u geysteen meesha kuwa aragtida qallafsan qabaa ay ka gaarayaan boqolkiiba 41,2. Qiyaas ahaan 12% waxay ardayda ay ka muuqdaan dabeecado aad u sarreeya ay afar meelood oo saddex meel ay u taagan yihiin gacangeysasha iyo hanjabaadda la xiriira dhalashada, diinta ama khaniisnimada qof wax loo geystay awgeed.

#### WAXYAALAHA AY INAAN DADYOWGA KALE LOO DULQAADAN WAXAY DHALATAA WAXBARASHADII OO LAGU KHASAARAY INTOLERANS ÄR FÖRKNIPPAT MED BLAND ANNAT SKOLMISSLYCKANDEN

Waxaa baaritaanka markii hore lagu ogaaday in heerka dulqaadxumadu aysan ka wada sineyn dhallinyarada. Natiijadii soo baxday ayaana sidaas taageereysa. Waxaa muuqata in ardayda aragtida wanaagsan iyo kuwa qaba aragtida qallafsan ay ku kala duwan yihiin meelo badan.

Heer sare oo ah aragtiyo qallafsan wuxuu badanaa ku xiran yahay arrimahaan

- Waxbarasho hoose iyo waalidka oo ka tirsan dabaqad hoose
- Waxyaabo shakhsi ahaaneed iyo kuwo dareen sida walaac, colaad iyo jimicla’aan (laakiin waxaan ku jirin welwelka)
- In dugsiga laga muujiyo natiijo liidata iyo dhaqanxumo
- Dhibaatooyin gaar ah oo qoyska ka dhexjira sida in uusan waalidku ka warqabin cidda uu ilmahoodu xiriirka la leeyahay
- Dhaqamo la caadeystay oo ragga iyo dumarka lagu kala soocayo (stereotypa genusnormer (caadooyin ragga mudnaan loogu siinayo)
- Dareen in bulshada dibedda laga joogo
- Xiriir joogto ah galabihii saaxiibada lagu la kulmo, badanaaba kooxkoox, iyo in la la kulmo saaxiibo dhawr sano ka weyn.

Cabbidda khamriga iyo in la xafladeeyo waxay ku badan yihiin kooxa aan dadka ka duwan u dulqaadan karin kolka loo eego guud ahaan dhallinyarada oo dhan. Waxaa xiriir adagi ka dhexeeyaa inaan loo dulqaadan karin dadka laga tirada badan yahay iyo kolka la dareemo in saaxiibadu ay cadaawad u qabaan dadka ajnebiga ah. Waxaa kaloo aad u adag xiriirka ka dhexeeya dhegeysiga muusiga quwadda caddaanka iyo in la caddeysto in cadaaqad loo qabo dadka laga tirada badan yahay. Waxaa kaloo taasi khuseysaa ku qancidda ama la dhacidda xisbiyada xagjirka ah. Natiijadu waxay khuseysaa gabdhaha iyo wiilasha dhigta dugsiyada dhexe/hoose iyo dugsiyada sare.

Natiijadu waxay u dhigantaa sawirka la bixiyey dhallinyarada nacaybka iyo dulqaadxumada ajnebiga u qaba oo horay baaritaanyo kala duwan loogu sameeyey iyadoo la adeegsanayo habab kale oo lagu dersayey dhaqamadooda iyo sida ay u nool yihiin. Baaritaanadu ma khilaafsana fekradda ah in xaaladdaa dhallinyaradu ku nool yihiin iyo iyagoo waxbarashada ku guuldarraystay ay qayb dhexe ka cayaarto. In ay dhallinyaradu soo maraan marxalado ay ugu nuglaadaan afkaarta xagjirka ah oo ajnebinacaybka ah. Dhallinyarada ku xumaata dugsiga ama ay haystaan dhibaatooyin kale waxaa ku sahlan in ay qaataan afkaarta kooxaha ajnebinacaybka ah si ay aqoonsi iyo xushmad ugu helaan. Taas micneheeduna ma aha in dhallinyarada kale oo aan dhibaatooyinkaas qabini ay u nuglaan karaan afkaarta kooxaha fidiya ajnebinacaybka iyo midabtakoorka.

#### ARRIMAHA DHALIYA DULQAADXUMADA IYO DEMBIGELIDDU WAA ISKU MID
#### RISFAKTORERNA FÖR INTOLERANS SAMMA SOM FÖR KRIMINALITET

Waxaa buugta cilmiga dembiyada lagu caddeeyey in arrimaha baaritaanku soo bandhigay oo muujinaya dulqaadxumo ay dhalin karaan dabeecado dembiyo sababi kara. In kastoo natiijadu muujineyso dhacdooyinka dhallinyarada aad uga soo horjeeda dadka ka duwan ay soo yaraadeen, taasi wax yar ayey ka beddeli lahayd in ay saameyso ka qaybgalka dembiyada iyo dabeecada bulshadiidka ah oo dhallinyarada ka dhexjira. Dembiyadu dhallinyaradu gashaa mid weyn oo ballaaran oo aan ku koobneyn dhallinyarada qaba dabeecadaha ajnebinacaynka ah, in kastoo sida natiijadu muujineyso ay dembigelista ugaga firfircoon yihiin dhallinyarada inteeda kale.

#### SAAMAYNTA DABEECADAHAASI WAA MUHIIM
#### ATTITYDPÅVERKAN VIKTIG

Dembiyada ka midka ah kuwa halkaan looga hadlay iyo kuwa lagu magacaabo dembiyada nacaybka waxa weeye dhibaato khatar ah oo bulshada ka dhex jirta. Kolka lagu daro tallaabooyinka badan – oo ay ka mid yihiin kuwa ay qaadaan hay'adaha dembiyada la dagaalama – waxaa kaloo lamahuraan ah laga dagaallanka dembiyada noocaan ah, iyo hawlo lagu saameynayo dabeecadaha. Waxaa aad muhiim ugu ah in la dhimo kooxaha ajnebinacaybka qabaa ay dhallinyarada sasabtaan oo ku xodxotaan in ay ku soo biiraan. Balse sida natiijada ku cad waxaa jira marxalo adkeynaya in wax laga beddelo dhaqamada dhallinyaradaas. Waxaa suurtagal ah in ugu fududahay in dhallinyarada ku sugan meel u dhexeysa dulqaad iyo dulqaadxumo loo soo leexiyo in ay qaataan dhabbo ay dadka ka duwan ugu dulqaadanayaan.